# Sidee ku qeexis  shisheeye aan la rabin kuu saameyn kartaa?

Waxaad ku qeexis rabid la'aan ay heshay Adeegga Imigrashanka- iyo (IND). Go'aanka aad heshay waxaa ku taal sababta lagu siiyay ku qeexis shisheeye aan la rabin. Warqaddan warbixineed ka aqriso waa maxay ku qeexis rabid la'aan iyo sida ay kuu saameyneyso.

1. Waa maxay ku qeexis rabid la'aan?
2. Muddadee ku qeexis rabid la'aan ay soconeysaa?
3. Waa maxay macnaha digniin gelinta hab warbixineed?
4. Goorma ayaa astaamahada shaqsiga laga saarayaa E&S ama SIS?
5. Maxaa dhacaaya haddii aadba Nederland joogto?
6. Maxaad sameyn kartaa haddii aad ka soo hor jeeddo ku qeexista rabid la'aan?
7. Goorma ayaad dib Nederland u soo geli kartaa?
8. Sidee u codsan kartaa ka dul qaadis ku qeexis rabid la'aan?
9. Maxaad yeeli kartaa haddii aad su'aalo qabto?

### 1. Waa maxay ku qeexis rabid la'aan?

Ku qeexis rabid la'aan waxaa ku taal in aan Nederland laga rabin. Waxaa ku qeexis rabid la'aan lagu siinayaa marka ay IND go'aamiso in adiga aad qatar ku tahay Nederland.waa xeer nidaamed ku beegan dadka inta badan galay fal dembiyeed culus ee xeerka ciqaabta. Inta badan waxay ku saabsan tahay dembi culus. Ku qeexis rabid la'aan waxay qasbeysa in aad isla markaa ka baxdo Nederland. Keddibna Nederland dib ma u soo geli kartid. Ku qeexista rabin la'aaneed waxa ay keeneysaa in lagaa digniin geliyo hab warbixineed. Ka aqriso su'aal 3 waa digniin gelintee.

### 2. Muddadee ku qeexis rabid la'aan ay soconeysaa?

Ku qeexis rabid la'aan ma laha taariikh ay dhammaaneyso waxayna joogsaneysaa marka ay IND go'aan qaadato. Taasi waxay noqon kartaa marka aad soo codsato ka dul qaadis ku qeexis rabid la'aan. Su'aal 8 waxaa ku taal sida ka dul qaadistaa loo dalbado.

### 3. Waa maxay macnaha digniin gelinta hab warbixineed?

Waxaa lagaa digniin gelinayaa ku qeexista rabid la'aanta. Laga digniin geliyay ama digniin gelin waxaa lagu jeedaa in ay dowladda ay magacaada geliso hab warbixineed. Dowladda adeegsiga digniin gelinta waxa ay ku arki kartaa in aad ku qeexan tahay shisheeye aan la rabin. Go'aanka waxaa ku yaal habka warbixineed oo la digniin geliyay. Waxaa jira laba hab:

- Fulinta & Digniin Gelinta (E&S)
  Kani waa hab warbixineed oo boliiska iyo Xad Ilaaliyeyaasha Boqortooyada oo Nederland. Boliiska iyo Xad Ilaaliyeyaasha Boqortooyada oo keli ah ayaa E&S kontrooli kara.
- Hab Warbixinta Schengen (SIS)
  Xad ilaaliyaasha iyo boliiska waddamada Schengen ayaa SIS baritaan ku sameyn kara. Baritaan keddib waa ay qaban karaan: fasax kuuma ah in aad waddanka gasho. Ka aqriso waddamada Schengen ka mid ah www.ind.nl/schengengebied ama www.ind.nl/schengenarea.

### 4. Goorma ayaa astaamahada shaqsiga laga saarayaa E&S ama SIS?

Haddi aad codsato ka dul qaadis ku qeexis rabid la'aanta codsigaana markaa lagaa oggolaaday.

### 5. Maxaa dhacaaya haddii aadba Nederland joogto?

Ku sugnaashada Nederland ciqaab ayeey mudan tahay. Waxaa lagu xabbisi karaa muddo ugu badnaan ah 6 bilood ama laguugu ganaaxi karaa dhowr kun oo yuro. Taasi waxa ay ku taal qodob 197 ee Buugga Sharciga Xeerka Ciqaabta.

### 6. Maxaad sameyn kartaa haddii aad ka soo hor jeeddo ku qeexista rabid la'aan?

Waxaad dacwad celin geeysan kartaa IND. Go'aanka aad heshay waxaa ku yaal sida aad taasi u sameyn karto.

### 7. Goorma ayaad dib Nederland u soo geli kartaa?

Haddii ay IND ku qeexista rabid la'aaneed kaa dul qaaddo. Taasi waxa ay dhici kartaa oo keli ah marka aad taasi IND ka codsato ayna kaa oggolaadaan. Xaalado degdeg ah oo aad gaar u ah haddii ay jiraan waxaad codsan kartaa in si ku meel gaar ah ku qeexista rabid la'aaned lagaaga dul qaado.

### 8. Sidee u codsan kartaa ka dul qaadis ku qeexis rabid la'aan?

Waxaad codsan kartaa in si ku meel gaar ah ku qeexista rabid la'aaned lagaaga dul qaado. Waxaad taasi u adeegsan kartaa foomka *Codsi ka dul qaadis ee caddeyn mid aan la dooneyn ama ka mamnucis soo gelitaan* (9004 of 9504) oo website-ka ka heleyso, soo buuxbuuxi una soo dir IND. Ama warqad ayaad u soo direysaa IND. U soo sharrax IND sababta ay IND (si ku meel gaar ah) ay kaaga dul qaadeyso ku qeexista rabid la'aan. Sona qor xitaa warbixinta soo socota:

- Muddo intee la eg (oo is raacsan) ayaad Nederland ka maqan tahay.
- In muddadaasi aad geeysatay dembiyo culus.
- In wakhtiga xaadirka ah aan laguu heeysan fal dembiyeed xeerka ciqaabta soo hoos gala.

Qof kale ayaa xitaa kuu codan karo ka dul qaadista. Markaa waa in aad qofkaasi si dhaxal gal ah u wakiilataa in uu magacaada ku hawl geli karo. Taasi warqad ayaad ku qoreysaa oo aad saxiixday. Waxaa taasi la yiraadaa awood siin. Awood siinta soo raaci codsiga ka dul qaadista ku qeexista rabid la'aanta.

U soo dir foomka ama warqadda:
IND Titel en Identiteit
Postbus 10
9560 AA Ter Apel

*Xaaladaha ka dul qaadis ku qeexis rabid la'aan*

IND waxay ku qeexista rabid la'aanta (si ku meel gaar ah) kaaga dul qaadi karta marka xaaladaha soo socda ay jiraan.:

- Waa lagama maarmaan in aad Nederland timaado xaaladao reekaada heysta awgood.
- Waa lagama maarmaan in aad Nederland timaado si aad kiis maxkamadeed uga marqaati furto.
- Waa lagama maarmaan in aad Nederland timaado maadama uu kiis xeerka ciqaabta Nederland kaaga socdo.
- Ku qeexista rabid la'aan waa mid ka soo hor jeedda Caddeynta Yurub ee Xuquuqda Baniaadamka (EVRM).
- Waxaad Nederland ka heshay oggolaasho joogitaan keddib marka lagu siiyay ka qeexis rabid la'aan.

*Dokumentiga ka dul gaadista ku qeexista rabid la'aanta*

Soo raaci foomka ama warqadda warbixinta ama dokumentiga soo socda:

- Sharaxaad sababta ay ka dul qaadista ku qeexista rabid la'aanta ee xaaladdaada ay u tahay daruuri.
- Astaamahaada shaqsiga oo dhammeys tiran iyo magacyo kale (aliassen) aad hore u adeegsatay.
- Koobiyada baalalka oo dhan ee baasaboorrada aad yeelatay sidii laguu dul saaray ku qeexista rabid la'aanta. Ama dokumentiyo kale oo lagu safri karo ama xad lagaga tallabi karo.
- Aragtida guud iyo caddeynta waddamada iyo magaalooyinka aad tagtay sidii laguu dul saaray ku qeexista rabid la'aanta. Taasi waxa aad ku muujineysaa in wakhtiga aad codsiga sameyneysay ku sugneyd goob ka baxsan Nederland. Ama aad dib ugu noqotay waddan -EU/EER- ah oo ku oggol in aad degganaato. Ka aqriso www.ind.nl/eueer ama www.ind.nl/en/eueea yaa ka mid ah waddamada- EU/EER.
- Dokumentiga dhaxalgalka ah ee dowladaha waddamada aad tagtay keddib dul saarista ku qeexista rabid la'aanta. Halkaa waa in laga dhex helaa in aad waddankaa aadan dembi culus ku gelin. Iyo in aan hadda waddankaasi laguu daba joogin fal dembiyed xeerka ciqaabta soo hoos gelaaya.

- Ma tahay qasab in aad wakhti gaaban Nederland joogto? Soo dir markaa xitaa warbixinta soo socota:
    - Taariikhda aad Nederland soo geleyso iyo magaalada aad Nederland ka soo geleyso.
    - Nambarka duulimmaadyada- soo gelista iyo dib u noqoshada.
    - Aragtida guud oo magalooyinka ee Nederland oo aad ku sugnaan doonto. Iyo caddeynta hubineysa ku sugnaashadaada iyo kharashka la xiriira.
    - Haddii uu quseeyso kiis xeerka ciqaabta: warbixin ku saabsan xaaladda taagan iyo geedi socodka kiiska xeerka ciqaabta.
- Haddii aad qof kale wakiilaneyso in uu kuu codsado ka dul qaadista: awood siinta oo leh saxiixaada.

Dokumentiyada waddamada dibedda oo dhaxalgalka ah waa in aad soo tasdiiqisaa aadna ku soo tarjumtaa afka nederlaandiiska, ingriiska, fransiiska ama jarmalka. Ka aqriso warbixin ku saabsan tasdiiqinta iyo tarjumistawww.ind.nl/legalisatie-vertaling of www.ind.nl/legalisation-translation.

### 9. Maxaad yeeli kartaa haddii aad su’aalo qabto?

- Booqo website-kenna www.ind.nl/ongewenstverklaring of www.ind.nl/en/undesirability.
- Wac leynka warbixinta ee IND +31 88 043 04 30. Waxaad nambarkaan heli kartaa isniin ilaa iyo jimce saacadaha 09.00 ilaa iyo 17.00 saac.

*Nuxurka daabacadda wax xuquuq ah lagama dhaxlaayo. Haddii ay tarjumista ay keento sharraxaado kala duwan, waxaa la tix raacayaa tan af nederlandiisaka ku qoran. Nuqul qoraalkan ka mid ah waa la isticmaali karaa haddii halkaa lagu xuso barta aad ka soo xigatay.*